

Su,aalaha ay weydiiyaan dadkaKaararka Deynta bixiya

- | | |
|----------------------------------|--|
| 1- Magac dhameystiran | 8 - Waqtiga shaqadaada aad ka shaqeyneysay |
| 2- Soshal Sikiyuuriti Numbar | 9 - Da,dada |
| 3- Cinwaanka gurigaaga | 10- Bangigaaga halkee ku yaal |
| -4 Imisaad cinwaankan ku nooleyd | 11 - Dhaqaalaha ku soo gala intuu yahay Xaguuse kaa soo gala |
| 5- Cinwaankaagii hore | 12 - Bangigaaga ma qofbaa wadaagtaan misewaa adiga uun |
| 6- Shaqadaada | |
| 7- Meesha aad ka shaqeyso | |

Deyn bixiyaha waxa uu ka doonayaa arrimo ku saabsan heybadda aad leedahay ama inaad karedhit fiican tahay iyo inkale hay,adaha ku shaqo leh arrintaas.

Hay,adaha aan sheegin magic xumida dadka ee toos loola xiriiri karo meel kale ayaad ka heli kartaa

HAY,ADAHA UGU BADAN BIXIYA WARBIKINTA DADKA

Equifax

Taleefoon: (800) 685-1111

Experian

Taleefoon: (888) 397-3742

Trans Union

Taleefoon: (800) 888-4213

Waa Maxay Warbinta Deynt Qaadashada

- **Caddeyn warbixintaada gaarka ah**

Magacaaga oo dhameystiran, cinwaankaaga hore iyo midka hadaba, meelihii aad ka soo shaqeysay 3dii sanno ee ugu danbeeyey

- **Qoraalo warbixin guud ah**

Warbixintaada guud oo laga soo xigto magaalada, gobolka iyo Maxkamadaha gobolkaba

- **Hey,adaha wararka iyo deynta aad bixin weyday aruuriya warar laga soo xigto**

Xisaabta uu deyn sheegtuhu u gudbiyey hay,adaha aruuriya deynta aan la bixin

- **Warbixinta xisaabta amaahdaada**

Magaca shirkadda, magaca numberka bangiga , nooca bangiga, taariikhda la furay, xadka amaahda la siin karo, inta hadda ku jirta inta uusan bixin ee hadda laga rabo islamarkaasna la dhaafay waqtigeeda iyo taariikhda la soo tabiyey

- **Hay,adaha codsadey warbixintaada faylkeeda**

Waxaa kaloo la dhihi karaa waydiimo, waana inta Hay,adood oo codsatay 24kii bilood la soo dhaafay warbixinta amaanadaada

Maxaa **qalad** ku ahaan kara warbixinta deymaha?


- Su,aalo badan
- Xadidaad weyn oo xaga deynta ah
- Deymo badan oo laga rab

Maxaa aad **ugu xun** warbixin Deymeed?

- Lacag kugu ururta
- Burbur wax walba ama xaalufid
- Warbixin xaga sharciga lagugu oogo iyo xukumaad

Hadda waxaad ka heli kartaa warbixin ku saabsan heybadaada oo lacag la,aan ah mid ka mid ah sadexda hay,adood sanadkiiba mar kana heli kartaa <http://www.annualcreditreport.com>

Toban Su,aalood aad weydiin karto ka hor intaadan saxiixin



1. Ma ubaahanahay horta sheygan hadda mise waan sugi karaa?
2. Miyaan la iman karaa shuruudaha laga robo qofka deyn doonaya?
3. Waa maxay qiyaasta ribada koreysa?
4. Ma lacago kalaa jira?
5. Imisaa la bixiyaa bishii, goormaase la iska rabaa?
6. Miyaan awoodaa bixinta bil walba intaas?
7. Maxaase dhacaya hadaanan waqtigeeda ku bixin lacagta?
8. Imisay ahaan lacagta dheeraadka ah marka aan deyn isticmaalo?
9. Hadaan iska daayo maxaa iga halaabaya?
10. Iyadoo loo eegayo waxaasoo dhan isticmaalka deyntu ma faa,iidaa?



Sida loo Isticmaalo Kaarka Deynta

- Iska bixi dhamaan biilalka kaarka waqtigii loogu talagalay si,aad uga badbaado ribo
- Haddii aadan kareyn, isku day intaad awood inaad bixiso sida ugu dhaqsaha leh
- Hadaad lacag cadaan u baahato hakal bixin kaarka deynta illaa inaad xal kale haysan mooyaane
- Iska ilaali daahinta lacagta iyo ganaaxyada badan
- Kaarkaaga lanbarkiisa taleefoonka cidna haka siin illaaa inaad adiga wacday oo aad taqaanid cidda aad wacayso mooyaane
- Hka bixin kaarkaaga lanbarkiisa taleefan guri ama kan gacantaba
- Iska celi dhamaan kaararka deynta ee aan wax faa,iido ah kuu laheyn, kalabax uun midka aan ribada laheyn ama yar tahay.
- Meel dhig dhamaan risiityada aad kaarka wax kaga gadatay kadibna hadhow marka bishaa ay soo diraan biilka isku fiiri
- Haddii aad aragto wax aadan gadan oo biilka lagugu soo daray ha bixin lacagtaa, bixi kalia intaad hubto oo saxda ah kadibna u gudbi hay,adaha ku shaqa leh iyadoo qoraal ah.
- Haddii uu kaa lumo ama lagaa xado kaarka deynta si deg-deg ah ula socodsii hay,adda kaarka deynta aad ka qaadatay
- Waligaa kaarkaaaga cid ha u dhiibin ama deemin
- Hadaad lanbar sir ah leedahay haku dul qorin kaarka dushiisa
- Dhamaan warbixinta kaarkaaga deynta ku saabsan meel xafidan dhig ka sooc kaararka kale.
- Haddii aad isku dartay kaarka deynta bangiga kiisa oo aad aruursaneysay iska hubi lacagta deynta aad u bixisay inaan kan bangiga aad ku urursaneyso lagu darin